



SOUTHWEST transitway

(Jidka socdaalka koonfur/galbeed)

macnaha cagaarka waa soco.

southwesttransitway.org

Buugga Yar ee Aqbaarta Qiimeynta Qorshaha

ee lagu taageerayo DEIS (Warbixinta Hore ee Raad Ku Reebidda Beyadeed)
ee loogu talagalay Mashruuca Southwest Transitway

Federal Transit Administration (FTA) [Maamulka Jidka Socdaalka Federaalka]
Hennepin County Regional Railroad Authority (HCRRA) [Xukunka Tareenka Goboleed ee Degmada Hennepin]
Sateembar 2008

Jadwalka Macluumaadka

Hordhac	1
Waa maxay warbixinta hore ee raad ku reebidda beyadeed, iyo waa maxay qiimeynta qorshaha?	1
Faafhaahin dheeraad ah ee qorshaha ku saabsan ii sheegaa; maxay tahay sababta loogu baahanyahay Southwest Transitway?	2
Southwest Transitway hadda kahor cilmi-baaris ma lagu saameeyay?	3
Qorsheyaalke baddalka noqon kara ee la tixgalinayo?	4
Sidee qayb uga ahaan kara nidaamka qorshaha?	6
Goormay, xaggee, iyo sidee xubanaha dadweyanaha ay fikradahooda uga dhiiban karaan?	6
Sidee uga qaybqaadan karaa hawlaha socda muddada qiimeynta qorshaha?	7
Sidey fikradahayga u saameyn doonaan hawlgalka?	7
Wa kuwama hayadaha dawladda ee ka qaybqaadanaya?	7
Waa maxay mowduuca beyadeed ee u baahan in la dhowro?	8
Foomka fikradaha lagu dhiibanayo qiimeynta qorshaha	9

Hordhac

Southwest Transitway waa mashruuca jidka socdaalka ee loogu talagalay si lagu habeeyo isusocodka qeybo ka tirsan degaannada koonfur/galbeed ee qayb ka ah deegaanka Twin Cities oo xita ay kamid yihiin magaalooyinka Eden Prairie, Minnetonka, Hopkins, Edina, St. Louis Park, iyo Minneapolis. Ujeeddada Hennepin County Regional Railroad Authority (HCRRA) inuu la kaashado Federal Transit Administration (FTA) si ay u noqdaan hayadaha hormuudka ah ee so diyaarinaya Southwest Transitway si ay u noqoto maalgalin jid socdaal ee weyn.

Ayadoo ah hay'adda masuul ka ah dhammaystiridda Draft Environmental Impact Statement (DEIS), HCRRA waxaa laga rabaa inay u hoggaansanaato shuruudaha ay dejiyeen Minnesota Environmental Quality Board (EQB) (Guddiga Tayada Beyadeed ee Minnesota) ee dhawraya sharciga Minnesota Environmental Policy Act (MEPA) (Minn. Stat. §116D.04 and 116D.045). Mashruucu waxa kale ee uu raadin doona maalgalin federaal ee laga helayo FTA. Sababta daraadeed, FTA waxaa laga rabaa inay la wareegto dib u eegidda beadeed ee lagu qancinayo National Environmental Policy Act (NEPA)(Sharciga Beyadeed ee Qaranka). FTA oo ah hay'adda hoggaaminta leh ee hoostimaada NEPA, iyo HCRRA oo ah hay'adda hoggaaminta hore leh ee hoostimaada EQB, waxay soo go'aamiyeen in mashruuca Southwest Transitway ay dhici karto in uu raad muuqda ku reebo bey'aadda. Si lagu qanciyo shuruudaha NEPA iyo EQB, labadoodaba, HCRRA iyo FTA ayaa soo diyaarinaya warbixinta DEIS ay ku yeelanayso mashruuca Southwest Transitway.

Buuggan Yar ee Warbixinta Qorshaha Lagu Qiimaynayo waxaa ku jira warbixin sharaxaysa nidaamka qiimeynta qorshaha, muqaalka iyo halka uu ku suganyahay qorshaha DEIS ee Southwest Transitway, iyo aqbaar la xiriirta sida ay dadweynaha uga qaybgali karaan qiimeynta qorshaha.



“

NEPA [42 U.S.C. 4321 et seq.] waa sharci lagu saxiixay in uu hirgalo Janaayo 1dii, 1970. Act (Sharciga) waxa uu dhisaya qawaaniinta lagu maamulayo sharciyada bey'aadda iyo ujeeddada lagu difaacayo, lagu dhawrayo, iyo kor loogu qaadayo bey'aadda, iyo lagu bixinayo nidaam hay'adaha federaalka ay ku hirgelinayaan ujeedooyinkan kana dhexeeya haydaha federaalka. NEPA waxa ay haydaha federaalka ka rabtaa inay isku shandheeyaan qiimaha beyadeed si ay uga mid noqdaan qaabka iyaga oo khuseeya saamaynta ay bey'aadda ku yeelanayso tallaabooyinka la soo jeediyay iyo qorsheyaalka macquulka oo lagu baddalayo tallaabooyinkaas.

EQB (Guddiga Tayada Beyadeed ee Minnesota) waxa uu door muhiim ka qaata bey'aadda iyo horumarinta Minnesota. Guddiga waxa uu soo diyaariyay qaanuunka, dhisidda qorsheyaalka muddada dheer, iyo dib u eegidda qorsheyaalka la soo jeediyay ee saamayn doona bey'aadda Minnesota. EQB waxa ay dejisaa qawaaninta maamulaya dib u eegyada beyadeed. Dib u eegyada beyadeed waxaa horseedaya MEPA Minnesota Environmental Policy Act Laws 1973 (Sharciga Beyadeed ee Minnesota Qaanuunka Sharciyada 1973), Chapter 412 (MEPA) Minnesota Statutes 116D.04.

Waa maxay hindisaha raad ku reebidda beyadeed, iyo waa maxay qiimeynta qorshaha?

Dukumiiintiyada DEIS ayaa sharaxaya waxtarka bulsho, dhaqale, iyo bey'adda ee ka imaan kara iyo raadka uu ku reebayo qorshaha la soo jeediyay ama waxqabka iyo tallaabooyinka la soo jeediyay ee wax looga qabanayo xaalad kasta oo ka soo horjeeda raadka ay reebayso si loogu hoggansanaado NEPA. Warbixinta DEIS ayaa shaaca laga qaadayaa si ay dib ugu eegaan dadweynaha iyo hayadaha daneeya fikiradna ka dhibtaan. DEIS iyo Final Environmental Impact Statement (FEIS) ayaa ka koobaan EIS ee hoosimaanaya NEPA.

Qiimeynta Qorshaha ayaa ah tallabada ugu horreysa ee hawlgalka NEPA/EIS. Hindisaha qiimeynta qorshaha aya loo sameeyay si loogu wargaliyo dadweynaha, kooxaha daneeyaa, qabaa'llada waxyeelloobay, iyo hayadaha dawlaadda ee DEIS (ay kamid yihiin fursadaha u furan ka qaybgalka dadweynaha) iyo la soo bandhigo ujeeddada iyo baahida loo qabo mashruuca, waxa lagu baddali karo ee la soo jeediyay si wax looga qaabto baahida jirta,

iyo waxtarka iyo raad reebidda ay ku yeelan karto dib u eegidda hore ee halwagalka NEPA/EIS ay ku samaynayaan dadweynaha iyo hayadaha.

Ujeeddada qiimeynta qorsha ayaa ah in lagu caddeeyo ujeeddada iyo baahida loo qabo mashruuca, waxa lagu baddali karo ee la soo jeediyay si wax looga qaabto baahida jirta, iyo in la aqoonsado xaaladaha ku saabsan bey'aadda kana dhalan kara ee la xiriira qorshooyin lagu baddali karo ee u baahan in si qoto dheer loogu baaro warbixinta DEIS. Hawlgalka qorshaha lagu qiimaynayo waxaa loogu talagalay in ay meesha ka saarto cilmi-baarisyo tifatiran ee xaaladaha aan sidaasi saamayn ugu yeelan doonin iyo/ama cilmi-baarisyo hore lagu soo xalliyay.

Hindisaha lagu qiimeynayo qorshaha waxa kamid ah saddex (3) kulanno dadweyne oo rasmi ah kaaso uu qofkasta ku dhiibanayo fikraddiisa oo ah hadal la duubayo ah iyo/ama qoraal. Faallooyinka qorshaha ee lagu qiimaynayo qorshaha waa inay culays saaraan ujeeddada iyo baahida loo qabo mashruuca, qorsheyaalka baddalka ah, iyo siiba raad reebidda muuqata ee bey'aadda anfacaysa iyo saamaynta loo baahanyahay in lagu baaro warbixinta DEIS.

Muuqaalka ujeeddoyinka iyo baahida loo qabo mashruuca waxa laga heli karaa bogga 2aad ee dukumiintigaan, warbixinno ay kamid yihiin qariidadda qorsheyaalka baddalka ahna waxa laga heli karaa bogga 4aad ee dukumiintigaan, iyo liistada qaybaha bey'aadda ee laga baarayo waxtarrada beyadeed iyo saamaynada waxaa laga heli karaa bogga 8aad ee dukumiintigaan.

Faahfaahin dheeraad ah ee qorshaha ku saabsan ii sheega; maxay tahay sababta loogu baahan yahay Southwest Transitway?

Southwest Transitway waa jid uu tareenka marayo (LRT) oo 14 mayl ee degaanka Minneapolis/St. Paul, kuna xiraya magaalada hoose ee Minneapolis degaannada horumarka badan ee koonfur/galbeed. Jidka tareenka LRT waxa uu kordhinaya awoodda gaadiidka degaannada aadka looga baahan yahay, jawaabna u noqonaya baahida loo qabo gaadiidka ee ka dhalatay kobaca guriiyeynta iyo shaqooyinka, lagu bixinayo fursado badanaya tartanka loogu jiro bixinta gaadiidka ay dadka raacan, iyo u adeegga dadweynaha ku xiran gaadiidka. Jidkaan tareenka waxaa lagu daraya nidaamka jidka socdaalka degaanka(jidka tareenka Hiawatha LRT, Northstar Commuter Rail (dhismihiisa uu socdo), iyo jidka Central Corridor LRT (la soo jeediyay).

Muqaalka ujeeddada iyo baahida mashruuca loo qabo

Saddexda xaaladood ee asaasiga u ah qorshaha Southwest Transitway ee muhiim u ah dadka deggan kana shaqeeya deegaanka koonfur/galbeed: 1) carriiriga ka yimid gaadiidka; 2) waxaa maqan gaadiid laysku hallayn karo ee qiimo jaban leh ee fursado siinaya dadka u baahan gaadiid ay raacaan; 3) waxaa maqan adeegyada baddala/soo noqoshada safarka gaaban ee gaadiidka.

Isusocodka: Deegaanka ay cilmi-baaristu ku socoto waxaa ka jira carriiri gaadiid taaso ay la xiriirto kobaca dadka deegaanka ku nool iyo kobaca shaqooyinka iyo yaraanta horumarinta kaabayaasha. Marka jidka la marayo, waqtigaan boqolkiiba 27 ee safarrada degaanka oo dhan waxa ay ka bilawdaan kuna dhammaadaan inta u dhaxeysa halka tareenka uu mari doono, iyo boqolkiiba 65 ee safarrada oo dhan waxa ay ka bilowdaan kuna dhammaadaan inta ay ka koobantahay degaan u dhow degaanka cilmi-baaristu ay ku socoto kuna kooban dadka deggan degaanka cilmi-baaristu ay ku socoto, iyo ka shaqeeya degaanka ay cilmi-baaristu ku socoto. Degaanka ay cilmi-baaristu ku socoto aya ah saldhigga shaqaaleeyayaal tiro badan. Magaalada hoose ee Minneapolis ayaa ah shaqaaleeyaha ugu weyn oo leh shaqooyin ka badan 140,000 (78 shaqo/dhulwareeg 4047 mitir), iyo degaanka Golden Triangle oo ah xarunta 6aad ee ugu weyn oo ay ka jiraan 50,000 shaqooyin (10 shaqo/dhulwareeg 4047 mitir). Marka lagu daro kobaca shaqooyinka ee sii kordhaya, deegaanka waxa soo foodsaray kobaca dadka degaanka soo degaya oo kor u dhafatay illaa 31,200 degganayaal cusub taniyo 1980dii oo

“

Liidashada cabbiridda isusocodka. Mn/DOT Metro District (Degmada Magaaloyinka), oo masuul ka ah maalgalinta gaadiidka ka jira siddeedda Metro District magaaloyinka deegaanka, waxa dhammaan ay jidadka waaweyn ku sifeyaan in ay leeyihiin cabbiraadda liidasho sare, dhexe ama hoose. Bacdama jidadka waaweyn ay yeeshaan gaadiid badan waqtiyada qaarkood, caadaadiska gaadiidka (mayl iyo waqti ahaanba) door adag ka qaadanaya mudnaanta iyo doorashada isusocodka xoojinta mashaariicda.

Basaska mara laymanka garabka jidka waxa ay u muuqdaan in ay u shaqeeyaan sida kuwa jid kasta garabka ka mara, laakiin Mn/DOT waxa ay basaska qaarkood u oggolaatay in ay isticmaalaan garabyada jidadka ee marka gaadiidka uu cariiri yahay, si markaasi lagu helo safar dhaqsi leh oo la isku halleyn karo xita marka uu jidka cariiri yahay.

Miitirada jidadka waa calaamadaha gaadiidka oo jidadka waaweyn lagu galo kuwaas oo gaadiidka siinaya fursad lagu cabbiro ama lagu maamulo tirada.

Miitirada jidadka ee laymanka jidka aan laga joogsanaynin waxa ay fursad u siinayan dadka hal gaari isla raaca iyo basaska in ay waqti ka faa'iidaystaan, iyo ugu dambayntii ay yaraato maylasha uu gaariga socday.

guryaha cusub ee ku yaalla Eden Prairie oo tira ahaan nus ka badan tiradaas.

Sidaa awgeed jiritaanka kobaca degitaanka iyo shaqalaynta badan, gaadiidka mara jidadka ayaa kor u kacay inta u dhaxaysa boqolkiiba 80 illaa boqolkiiba 150 taniyo 25kii sanadood ee la soo dhaafay. Tirada jidadka waaweyn ee degaanka cilmi-baaristu ku yaalla sida—TH 100, TH 169, TH 62, I 494, I 394, iyo TH 7—ayaa Minnesota Department of Transportation (Mn/DOT) (Waxaad Gaadiidka Minnesota) waxay ku tilmaantay inay yihiin kuwo aan xamili karin tirada gaadiidka isusocda. Qorshaha muddada dheer ee laga soo xigsaday MN/Dot, Transportation System Plan (TSP) (Qorshaha Nidaamka Gaadiidka), ma jiraan wax qorshe ah ee lagu ballaarnayo ama lagu habaynayo jidadkaas mara degaanka ay cilmi-baaristu ku socoto.

Waxaa in laba jibbaar ka badan kor u kacay dadka raaca basaska eksbreeska ee SouthWest Transit (Gaadiidka Koonfur/Galbeed) iyo Metro Transit (Gaadiidka Degaanka) ee ka shaqeeya degaannada ka baxsan magaalada hoose kuwaas oo 10kii sanadood ee la soo dhaafay gaadiid safar sanadeedka illaa 1 milyan uu marki ugu horreysay kor u dhafay sanadkii 2007. Faa'idooyinka gaadiidka oo ay kamid yihiin basaska dhinac ka mara jidadka waaweyn, meelaha basaska ay dadka ka qaadan iyo ku dejiyaan, iyo meelaha loogu talagalay inay basaska dhinac maraan laymanka gaadiidka kale ayaa laga hirgaliyay degaanka oo dhan, laakiin waxaan weli la xadadin xawaaraha baska, xita kuwa dhinac maraya laymanka gaadiidka kale oo xawaaraha ugu badan

ee loo ogolyahay uu yahay ugu badnaan 35 mayl (mph) halkii saacad ayaado xaaladaha jidadka gaadiidku maro uu ciriiri yahay.

Bacdama ay meesha ka maqantahay qorshe lagu dhisayo jidad waaweyn ee qaada gaadiid dheeraad ah iyo dhulka jidadka ay marayaan magalada hoose ee Minneapolis oo kooban, mustaqbalka baahida kor u kacaysa ee loo qabo gawaarida iyo basaska jidadkan ma xamili kara gaadiikaasi.

Jiritaan la'aanta fursadaha lagu helayo gaadiid ay isku halleeyaan dadka ku tiirsan gaadiidka:

Bacdama ay jidadka la marayo ciriiri yihiin – isla jidadka ay maraan baasaska la raaco – waxa adkaatay in la bixiyo gaadiid soo gaabinaya muddada socdaalka oo dad badan soo jiita (haysta doorashada gaadiidkooda ama basaska ay raacaan) nidaamka basaska iyo si macquul ah u adeega dadka gaadiidka caamka u raaca magaalada hoose ee Minneapolis iyo degaannada u dhow.

Jidadka ku yaalla degaannada ay cilmi-baaristu ku socoto ayaa ah kuwo u kala socda dhinaca waqooyi-koonfur/bari-galbeed halka qaababka horumarinta ay ka socoto ayaa dibadda uga soo baxaya magaalada hoose ee Minneapolis oo dhinac u jaanjeera. Tanina waxa ay sababaysaa in muddada safarka ay sii dheeraato ee gaariga lagu darayo iyo safarrada gaadiidka sababo la xiriira joqaraafiga iyo qaabka ay jidadka u dhisan yihiin. Si lagu yareeyo muddada safarka gaadiidka, Twin Cities waxa ay noqotay hoggaminta qaranka ee isticmaalka laymanka uu baska maro. Hadda, Twin Cities waxa ay leedahay

250 mayl wax ka badan oo basaska ay dhinac kaga marayaan jidka weyn. Tashiilaadkan waxa ay basaska siinayaan waqtiga safarka inay kaga fiicnadaan gawaarida gaarka loo leeyahay waqtiga uu gaadiidka carriiri yahay, laakiin sharciga gobolka aya xadidaya xaaladaha isticmaalkooda ku socodka jidka in uu noqdo 35 mayl ama ka hoose iyo in uusan baska ku socon xawaare ka badan 15 mayl midka u qoran in jidka lagu socdo. Sidaan horay u sheegnay jidadka waaweyn oo dhan ee cilmi-baarista deegaanka aya MN/DOT tilmaantay in isusocodka uu liito waqtiga uu gaadiidka aad u badanyahay. Tan waxa ay si xun u saamaynaysaa awoodda ay basaska jidka mara laga helo waqti safarka oo ka fiican waqtiga uu jidadka aad loo isticmaalo si ay ku soo jiidato dad ka soo raaca degaannada ka baxsan magaalada hoose oo ay ku soo biiran raacitaanka basaska.

Tirada dadka ku xiran basaska waxa ay ku sii badanayaan deegaanka cilmi-baaristu ay ka jirto, ugu badnaan inta u dhaxaysa agaarka iyo magaalada hoose ee Minneapolis. Degaannada kobaca waxaa kamid ah xaafadaha Norht Loop, Harrison, iyo Bryn Mawr. Joqraafiga jidadka mara degaannadaan, siiba Harrison iyo Bryn Mawr, waxa ay adkeynayaan in la helo jid soo gaabiya muddada safarka. Jidadka xaafadahan mara waa ay isuso wareegaan waxayna ay leeyin jidad badan ee hal dhinac kaliya u socda. Xaalado badan, dadka ku nool Magaalada hoose ee Minneapolis ee u jira dhowr mail oo kaliya waxay uu safarka ku qaadan karaan muddo 9 daqiiqadood illaa 13 daqiiqadood waxaana sabab qaabka jidadka basaska.

Maqaanshaha gaadiid adeegyada basaska

dadka dib u celiya: Iyadoo ay u dheertahay kobaca shaqooyinka ka jira Magaalada hoose ee Minneapolis, magaaloooyinka kale waxa soo foodsaray, iyo ay dhici doonto in ay soo foodsarto, shaqo badni dhici doonta mustaqbalka soo socda. Sida ay wax u socdaan waxa ay kobaca boqolkiiba 65 ee safarrada gaadiidka ee degaanka cilmi-baaristu ka jirto. Safarradaan tiradoodi badantahay ee gaadiidka dadka dib ugu celinaya xaafadaha u dhow magaalada hoose ee geeya xaruumaha shaqada ee ku yaalla deegaannada magaalada ka baxsan. Waqtiga lagu jiro xaruumahan shaqada basaska ma ay tegi karaan

Hadda kahor cilmi-baarista ma lagu sameeyay Southwest Transitway?

Bilowgii 1980mada, Southwest Transitway waxa loo haystay in ay noqon karto jidka LRT u adeega jaalliyadaha Minneapolis iyo Hopkins. Arrimaha isusocodka jidkaan maraya, oo lagaga warbixiyay qaybti hore, waxa si fiican shaaca looga qaaday

bilowgii 1980yad. Cilmi-barisyadii hore waxaa kamid ah:

- Qorshe LRT System Plan ee u midaysan Degmada Hennepin (1988)
- Draft Environmental Impact Statement Hennepin County Light Rail Transit System (1988) (Warbixinta Hore ee Raad ku Reebidda Beyadeed Jidka Socdaalka Tareenka ee Degmada Hennepin)
- 29th Street iyo Southwest Busway Feasibility Study (2000) (Cilmi-baris Surgalka Jidka Baska ee Koonfur/Galbeed)
- 29th Street iyo Southwest Corridors Vintage Rail Trolley Study (2000)
- Transit 2020 Master Plan (2000)
- Twin Cities Exclusive Busway Study (2000)
- Transit 2025 Master Plan for Transit (2001)
- Southwest Rail Transit Study (2003)
- Southwest Transitway Alternatives Analysis (2007)

Muddooyinkii dhawaa, Metropolitan Council's 2030 (Guddiga Metropolin) qorshaha gaadiidka muddada dheer ee gobolka, waxa uu u aqoonsaday in Southwest Transitway la hargaliyo kahor inta aan la gaarin 2030. Waxana sii dheer in cilmi-baarista kasta ee jaalliyadaha deegaanka ay tixraac ka dhigtaan Southwest Transitway qorsheyaal xaafad ahaan u midaysan.

Baarista Qorsheyaalka Baddalka u ah Southwest Transitway, 2007

2007dii, HCRRA waxa ay dhammaysay rabiitaanka federaalka ee cilmi-baarista la yiraahdo Alternatives Analysis, taaso ah mid sii wadaysa cilmi-baarista *Southwest Rail Transit Study, 2003. The Southwest Transitway Alternatives Analysis (AA)* waxa ay isbarbar dhigaysaa faa'idooyinka, qarashka iyo



Si lagu caawiyo in lagu ogaado kala doorashoyinka baddalka ah ee qancinaya baadhida, shanta ujeedo aya la isku xiray ahmiyad ahaan in la horumariyo.

1. Hagaajinta isusocodka.
2. Ku baxa qarash la xamili karo, hagaajisa fursadaha saffarka.
3. Difaacaysa bey'aadda.
4. Dhowraysa tayada nolosha.
5. Taageeraysa horumarinta dhaqaalaha.

saamaynta cadadka jidka tareenka qorshooyinka baddalka ah (dhinaca iyo qaabka) si lagu aqoonsado kuwa ku wada kulminaya baahida jaalliyadaha oo ku xusan Purpose and Need Statement (Bayaanka Ujeeddada iyo Baahida).

Qorsheyaalka baddalka u ah jidka tareenka waxaa lagu qiimayay si lagu ogaado in ay qancinayaan shanta ujeedo. Kaddib markii la qiimeeyay mid uu hal bas maro, labada bas ee gaadiidka deg-degga ku socda, iyo jidka tareen ee ka kooban sideed tareen ee qorsheyaalka baddalka ah, waxaa la isku raacay in LTR (jidka tareenka) in uu yahay qaabka gaadiid ahaan saddex kamid ah sideeda LRT (jidada tareenka) uu maro ay qancinayso shanta ujeeddoyin. Waxaa sii dheer, qorsheyaalka baddalka ah ee basaska, ee lagu magacaabo Enhanced Bus (Baska la Habeeeyay), waa la sii haysanayaa inkasto oo uusan u shaqayn doonin sida uu ugu shaqeeyo qorsheyaalka baddalka ah ee LTR (jidka tareenka), si loo si wado qiimaynta fursadaha wax ka qabanaya baahida isusocodka sii badanaya ee ka jira adeegga baska oo la hagaajiyo inta laga isticmaali laha LTR. AA waxa ay ku gunaanadday in hagaajinta isusocodka ay tahay sida ugu fiican ee wax looga qabto ay tahay ayadoo maalgalin



Choice rider (rakaabka fursadda leh) waa qof aan u baahnayn in uu isticmaalo basaska safarka uu malin kasta galo, laakiin doorta in uu isticmaalo sababo la xiriira dhib yarida, ka faa'idaysashada waqtiga, dhaqaalaha (qarash barkiina oo u baaqda), ama arrimahaan oo laysku daro.

Transit-dependent person (qofka aan baska ka maarmin) waa qof sharci ku ah in uu isticmaalo baska si ay maalin kasta shaqada u aadaan. Federal Transit Administration (Maamulka Gaadiidka Federaalka) waxa ku qeexaysa qofka baska u baahan 1) in uusan haysan gaadiid u gaar ah, 2) waayeel (ka weyn 65 sanadood), 3) dhallinyar (ka yar 18 sanadood), iyo 4) qof ka hooseya faqriga ama meelhexaadka daqliga sida ay u qeexeen U.S. Census Bureau (Guddiga Tirakoobka Maraykanka).

Reverse commuting (safarka dib u noqoshada) waxaa laga wada qof magaalada hoose deggan oo shaqa u aada degannada magaalada ka baxsan. Tan waxa ka horjeedda gaadiidka caadiga ah ee uu qof deggan degaannada magaalada ka baxsan ee magaalada hoose shaqa u soo aada.



lagu sameeyo mid kamid ah saddexda LRT ee suurtagalka ee baddalka qorshooyinka ee iskuxiri doonaa xaafadaha degaannada, ganacsiga, shaqada, iyo dhaqdhaqaaqyada xaruumaha maawelooyinka ee deegaanada ay cilmi-baaristu ka socoto.

AA waa barta bilowga ee DEIS iyo waxa ay tahay salka qiimeynta qorshaha.

Maxay yihiin qorsheyaalka baddalka ee la khusanaayo?

Marka loo eego AA, qorsheyaalka baddalka ee saddex LTR iyo hal Enhanced Bus aya lagu soo jeediyay in lagu daro DEIS.

Qorshooyinka baddalka waxaa kamid ah boosaska steeshinada, baabur-dhigista iyo basaska laga raaco, iyo jidadka u dhaxeeya meelaha basaska laga raaco.

Dhowritaanka LTR iyo meelaha wax la dhigto, xaafad ahaan weli lama go'aaminin.

Light Rail Transit 1A (Jidka Socdaalka Tareenka 1A): Qorshahan baddalka ah waxa ay ka shaqayn doonta magalada hoose ee Minneapolis illaa Eden Prairie (TH 5) ayadoo lagu sii darayo jidka tareenka Hiawatha LRT ee laga raaco 5th Street, sii dhaafaya magaalada hoose ee Minneapolis Intermodal Station to Royalston Avenue, si maraya Kenilworth Corridor illaa Minneapolis iyo dhismaha HCRRA ay ku leedahay illaa St. Louis Park, Hopkins, Minnetonka iyo Eden Prairie ee ku dhammaanaya TH 5 iyo dhismaha HCRRA. Steeshinada la so jeediyay ee ku yaalla Royalston Ave., Van White Blvd., Penn Ave., 21st St., West Lake St., Beltline Blvd., Wooddale Ave., Louisiana Ave., Blake Rd., magaalada hoose ee Hopkins, Shady Oak Rd., Opus, City West, Golden Triangle, Eden Prairie Major Center ee ku dhammaanaya TH 5 iyo Mitchell Road. Stations ayaa loo soo jeediyay Royalston Ave., Van White Blvd., Penn Ave., 21st St., West Lake St., Beltline Blvd., Wooddale Ave., Louisiana Ave., Blake Rd., magaalada hoose ee Hopkins, Shady Oak Rd., Opus, City West, Golden Triangle, Eden Prairie Town Center, SouthWest Station, iyo Mitchell Rd. Alternative 3A ayaa lagu muujinaya Qariidadda 1.

Light Rail Transit 3A (Jidka Socdaalka Tareenka 3A): Qorshahaan baddalka ah waxa u ka shaqayn doonaa laga bilaabo magaalada hoose ee Minneapolis illaa Eden Prairie (Mitchell Road/ TH 5) ayadoo ay sii marayso Hiawatha LRT jidka mara 5th Street, sii dhaafaya magaalada hoose ee Minneapolis Intermodal Station illaa Royalston Avenue, illaa Kenilworth Corridor ee sii maraya Minneapolis, dhismaha HCRRA ee ku yaalla St. Louis Park iyo Hopkins, illaa jidka cusub ee midigta xaqa leh ee sii maraya deegaanka Opus/Golden Triangle, deegaanka Eden Prairie Major Center ee ku dhammaanaya TH 5 iyo Mitchell Road. Stations ayaa loo soo jeediyay Royalston Ave., Van White Blvd., Penn Ave., 21st St., West Lake St., Beltline Blvd., Wooddale Ave., Louisiana Ave., Blake Rd., magaalada hoose ee Hopkins, Shady Oak Rd., Opus, City West, Golden Triangle, Eden Prairie Town Center, SouthWest Station, iyo Mitchell Rd. Alternative 3A ayaa lagu muujinaya Qariidadda 1.



Light Rail Transit 3C (Jidka Socdaalka

Tareenka 3C): Qorshahan baddalka ah waxa uu ka shaqa bilaabayaa magaalada hoose ee Minneapolis illaa Eden Prairie (Mitchell Road/TH 5) sii maraya Nicollet Mall illaa Nicollet Avenue (jid hoomaraha Franklin Avenue illaa 28th Street), Midtown Corridor dhexmaraya Minneapolis, dhismaha HCRRA ee ku yaalla St. Louis Park iyo Hopkins, illaa jidka cusub ee midigta xaqa u leh ee sii maraya deegaanka Opus/ Golden Triangle, degaanka Eden Prairie Major Center kuna ekaanaya TH 5 iyo Mitchell Road. Steeshinada la soo jeediyay ee ku yaalla 4th St., 8th St., 12th St., Franklin Ave., 28th St., Lyndale Ave., Hennepin Ave., West Lake St., Beltline Blvd., Wooddale Ave., Louisiana Ave., Blake Rd., downtown Hopkins, Shady Oak Rd., Opus, City West, Golden Triangle, Eden Prairie Town Center, SouthWest Station, iyo Mitchell Rd. Alternative 3C ayaa lagu muujinaya Jaantuska 1.

Enhanced Bus (Baska la Habeeeyay):

Qorshaha baddalka ah ee Enhanced Bus, ee loo yaqaanno Transportation System Management (TSM) Alternative, waxaa loo sameeyay si lagu helo qarash jaban, la habeeeyay howlgalintiisa si loo qanciyo ujeeddada qorshaha iyado si dhaqsa leh loogu baahyanahay ayada aan lagu sameeynin maalgalin weyn ee baska. Waaxa kamid ah isbaddallo yar ee lagu sameeyay adeegga gaadiidka deg-degga ah ee jira, iyo waxa uu siyaado ku yahay Metro Transit iyo adeegyada u dhexeeya SouthWest Transit ee Minneapolis iyo Eden Prairie, Minnetonka, Hopkins, iyo St. Louis Park. Qorshahan isbaddalka ah waxa uu ka adeegi doona New Starts Baseline ee ka hormiimaysa middka ka qarash yar ee qorshaha la soo jeediyay lagu cabbiri doono, iyo waxa kamid ah habayn lagu aqoonsaday No-Build Alternative (Qorshaha Baddalka Lama-Dhisayo). Enhanced Bus Option (Fursadda Baska la Habeeeyay) waxaa lagu muujinaya Jaantuska 2.

No-Build Alternative (Qorshaha Baddalka

Lama-Dhisayo): No-Build Alternative waxaa kamid ah in jidadka basaska ay maraan oo dhan iyo habeynta adeegyada (marka laga reebo qorshaha la soo jeediyay) la qorsheyay, la barnaamij galiyay, iyo lagu darayo Financially Constrained Regional Transportation Policy Plan (Qorshaha Dhaqaalaha ee Qaanuun Ahaan Xaddidaya Gaadiidka Gobolka) ee lagu hirgaliin doono Sanadka 2030. Waxaa kamid ah adeegyada yar ee gaadiidka lagu fidinayo iyo/ama saxiitanno marqaati u noqonaya sii waddida qanuunada adeegyada jira sida ay u xaqiyeen Metropolitan Council (Guddiga Magaalaynta). No-Build Alternative waxa ay u adeegaysa salka NEPA taaso ay dhici karto iska horimaad badan ee nafacaadka beyadeed iyo saamaynta qorsheyaalka baddalka ah, ay kamid yihiin qorshooyinka la soo jeediyay, waa la cabbiri doona.

Sideen qorshaha uga qaybgali karaa?

Qof kasta ee danaynaya Southwest Transitway iyo nacfiga beyadeed ee ka soo bixi doona iyo saamaynta waxa lagu dhiirrigalinaya in ka qaybqaataan qorshaha lagu qiimaynayo. Fikradaha waa in lagu soo gudbiyo inta lagu jiro muddada qorshaha lagu qiimaynayo, oo ku eg Nofeembar 7, 2008, 5:00 Galabnimo. Si looga qaybqaato qaabka, marka hore aqriso buuggan yar si aad wax badan uga baratid waxa la qorshaynayo. Marka labaad, ka qaybqaado shirarka qorshaha lagu qiimaynayo si aad wax dheeraad ah uga baratid iyo la wadaagtid fikradahaaga, ra'yigaga, iyo bixinta fikradahaaga. Marka saddexaad, fikradada ku dar qorshooyinka baddalka ah ee la baari doono, wax kasta ee muhiim ah ee saameynaya bulshada, dhaqaalaha ama saamaynta bey'adda ee lagu qiimaynayo DEIS, iyo fikradaha la xirira ujeeddada iyo baahida ee qorshaha la soo jeediyay.

Fikradaha waxa lagu dhiban karo saddex (3) siyabood ee kulamada qorshaha lagu qiimaynayo ama qoraal ahaan loogu diro, email, fakis ayadoo aan laga dabamarin 5:00 Galabnimo, Nofeembar 7, 2008. Si danahaaga loo tixgaliyo warqad fikradda dadweynaha ayaa lagu soo lifaaqayaa warbixintan. Fikradaha waxa kale ee si toos ah loo horkeeni karaa shabakadda internetka ee Southwest Transitway Web, www.southwesttransitway.org.

Ka qaybgalka midaya ee Public Involvement Program iyo a Coordination Plan ee dadweynaha loogu talagalay iyo ka qaybgalka ka dhexeya hayadaha ee lagu falanqaynayo qorshaha Southwest Transitway aya waxa ka qaybqaadnaya dadweynaha iyo hayadaha ka shaqeeya DEIS in ay diyaar ku yihiin shabaakadda internetka Southwest Transitway ama ayado la soo xiriir Ms. Katie Walker, Maamulaha Qorshaha.



Fikrado ka dhiibo:

- Cilmi-baarisayada la xiriira qorshooyinka baddalka ah,
- Wax kasta ee macna ku yeelan kara bulshada, dhaqaalaha ama xaaladaha beyadeed ee wax lagu qiimaynayo, iyo
- Bayaanka Ujeeddada iyo Baahida.

LA SAMEEYO:

- La aqriyo buugga ayr
- Laga qaybqaato kulamada qorshaha lagu qiimaynayo (khiyaar)
- Sheeg waxa ay kula tahay in cilmi-baaris lagu sameeyo.



Goormaa, xaagge, iyo sidee xubanaha dadweynaha ay fikradahooda u dhiiban karaan?

Muddada rasmiga ee fikradaha ee loo dirayo Southwest Transitway DEIS waxa ay ku egtahay Nofeembar 7, 2008, 5:00 Galabnimo. Inta lagu jiro muddadaas, dadweynaha iyo hayadaha waxaa lagu dhiirrigalinaya inay soo gudbiyaan fikradahooda ayaga oo qoraal boostada Maraykanka, fakis, email ama Shabakadda internetka (eeg hoose ee qofka la xiriirayo) ku soo diraan ama hadalkooda ka dhiibtaan saddexda kulan ee rasmiga ee qorshaha lagu qiimaynayo jadwalkooda.

Kulamada rasmiga ee qorshaha lagu qiimaynayo waxa jadwalkooda uu u dhici doona tariiqaha soo socda iyo meelaha ay ka dhacayaan:

Talaadada, Oktoobar 7, 2008
2:00 Duhurnimo qof kasta waa imaan karaa
3:00 Duhurnimo dhageysiga dadweynaha
Hennepin County Government Center
300 South 6th Street
Minneapolis, MN 55415

Talaadada, Oktoobar 14, 2008
5:00 Galabnimo qof kasta waa imaan karaa
6:00 Galabnimo dhageysiga dadweynaha
St. Louis Park City Hall
5005 Minnetonka Boulevard
St. Louis Park, MN 55416

Khameeska, Oktoobar 23, 2008
5:00 Galabnimo qof kasta waa imaan karaa
6:00 Haabeennio dhageysiga dadweynaha
Eden Prairie City Hall
8080 Mitchell Road
Eden Prairie, MN 55344

Fadlan xusuuso: inta lagu jiro muddada ay fikradaha furanyihiin ee kulamada rasmiga ee qorshaha lagu qiimaynayo, shaqaalaha qorshaha waxa ay diyaar u ahaan doonaan in ka jawaabaan su'aalaha. Showrka rasmiga ah ee ka horreya HCRRA waxa la bilaabi doona ayaada oo ay la socoto qaybta dhageysiga dadweynaha ee kulamada

qorshaha lagu qiimaynayo. Si lagu hubiyo in dhammaan kuwa doonaya in ay fikrad ka dhiibtaan HCRRA waxa qof kasta la siin doonaa saddex daqiiqadood (3) oo ay fikradaha u sheegaan HCRRA.

Kaaliyayaasha kumeelgaarka ah, qalabka adeegyada iyo isgaarsiinta oo ah kuwo lagu isticmaalo luqado ka duwan Ingiriisiga waa la diyaarin karaa **haddii ogaysiiska lagu dhiibo ugu yaraan 14 maalmood kahor inta uusan kulanka dhicin** ayadoo la soo xiriirayo Ms. Katie Walker oo laga helayo cinwaanka, telefoonka lambarka, cinwaanka emailka ee hoose.

Fikradaha waxa kale ee qoraal ahaan loogu diri karaa:

Warqadda boostada ugu dir: Ms. Katie Walker, AICP, Transit Project Manager, Hennepin County, Housing, Community Works & Transit, 417 North 5th Street, Suite 320, Minneapolis, MN 55401

Fax: 612-348-9710

E-mail: Katie.Walker@co.hennepin.mn.us

Shabakadda internetka:
www.southwesttransitway.org

Telefoonka: 612-348-9260

Fikradaha waa in la helo 5:00 galabnimo, Nofeembar 7, 2008.

Aqbaar dheeraada ee la xiriirta nidaamka qorshaha lagu qiimaynayo, la xiriir Ms. Katie Walker oo laga helo cinwaanka, telefoonka, ama cinwaanka emailka kor ku xusan.

Macluumaadka qoraalka ah, warbixinta cusub ee qorshaha, iyo qalabka lagu isticmaalo kulmada dadweynaha ee qorshaha lagu qiimaynayo waxaa la soo gelin doonaa shabakadda internetka ee qorshaha Southwest Transitway: www.southwesttransitway.org.

Hayadaha dawladda waxa lagu martiqaadi doonaa kulamo gaara oo qorshaha lagu qiimaynayo.

Sidee uga qaybgali karaa Muddada Qiimeynta Qorshaha?

Inkasto muddada rasmiga ee qiimeynta qorshaha uu ku egyahay Nofeembar 7da, 2008, haddana waxaa sii soconaya fursadaha ay dadweynaha uga qaybqaadanayaan DEIS. Fursadaha ka qaybgalidda waxaa kamid ah jiritaanka kulamada ay xubanaha la yeelanayaan dadweynaha, qabiillada, ganacsatada iyo kooxaha jaaliyadda, iyo hayadaha dawladda.

Fursadaha ay hayadaha jaaliyadda kaga hadlayaan iyo wax ku kordhinayaan inta lagu jiro muddada muhiinka ah ee cilmi-baarista ay socoto (Jadwalka DEIS ee ku yalla bogga 8aad).

Sidee fikradaha u saameyn doonan hawlalka?

Fikradaha dadweynaha iyo kuwa hay'adda waxa lagu hubinaya in ujeedda iyo baahida loo qabo qorshaha uu yahay mid si fiican u qeexan, baddalid ku habboon ayay yihiin kuwo la qiimeynayo, iyo saamaynta ay ku yeelan doonto nacyada beyadeed iyo saamaynta ay leeyihiin kuwo la tixgalinayo kahor inta aan go'aan laga gaarin in qorshaha lagu dhaqaado. Fikradaha waxaa la dhiiban karaa inta lagu jiro muddada qorshaha la qiimeynayo ee ujeeddada iyo baahida loo qabo qorshaha, mowduucyada qorshooyinka baddalka, iyo qaybaha macluumaadka beyadeed ayaa falanqayn lagu samayn doona si lagu ogaado nacyada weyn iyo saamaynta. Muddada qorsha lagu qiimeynayo waxa ay ku ekaan doontaa Nofembar 7da, 2008.

Kaddib marka muddada qorshaha lagu qiimeynayo ay dhammaato, hayadaha hoorseedka u ah DEIS(HCRRA iyo FTA), iyaga oo la tashanayo hayadaha ka qaybgalaya, waxa ay dib u eegi doonaan fikradaha la soo jeediyey oo dhan, ka jawaaban fikradahaas, iyo ay fikradahaas ku dhammaystiraan ujeeddada baahida, la toosiy qorshooyinka baddalka ah iyo la aqoonsado qaybaha macluumaadka ee lagu qeexayo DEIS. Fikradaha soo gaaray, jawaabaha, iyo saamaynta ay ku yeelan doonaan Scoping Report (Warbixinta Qorshaha lagu Qiimeynayo) waxa loo soo bandhigi doonaa dadweynaha iyo hayadaha ka qaybgalaya.

Waa kuwee hayadaha dawladda ee ku hawlana?

Ugu yaraan, hayadaha dawladda ee soo socda waxa la weydiin doonaa hay'aada hoorseedka u ah ka qaybqaadashada soo diyaarinta DEIS:

Haydaha Federaalka: Advisory Council on Historic Preservation, U.S. Army Corps of Engineers, U.S. Department of Agriculture, U.S. Department of Housing and Urban Development, U.S. Department of Interior, U.S. Department of Transportation (USDOT)/Federal Highway Administration, U.S. Environmental Protection Agency, U.S. Federal Aviation Administration, U.S. Federal Emergency Management Agency, U.S. Federal Railroad Administration, U.S. Fish and Wildlife Service, and U.S. Homeland Security.

Hayadaha Gobolka: Minnesota Pollution Control Agency, Minnesota Department of Health, Minnesota Department of Transportation, Minnesota Environmental Quality Board, Minnesota Department of Natural Resources, Indian Affairs Council, Board of Water and Soil Resources, Office of the State Archaeologist, Minnesota Department of Agriculture, Minnesota Department of Commerce, State Historic Preservation Office, and the Minnesota Historical Society.

Maamullada Gobolka: Metropolitan Council, Metro Transit, Three Rivers Park District, Minnehaha Creek Watershed District, Nine Mile Creek Watershed District, Riley Purgatory Bluff Creek Watershed District, and the Mississippi Watershed Management Organization.

Degmada Hennepin: Maamulaha Degmada.

Hantidhowrka Degmada Hennepin

Dowladda Hoose: Magaalada Minneapolis, Magaalada St. Louis Park, Magaalada Hopkins,

Magaalada Edina, Magaalada Minnetonka, iyo Magaalada Eden Prairie.

Kuwo kale: Native American Tribes (Qabiillada Maraykanka Hindida, iyo degmoyinka dugsiyada.

Maxay yihiin mowduucyada beyadeed ee la tixgalin doono?

Ujeeddada nidaamka DEIS aya ah in goob dadka u furan lagu indha-indheeyo saamaynta qorshooyinka baddalka ay ku yeelanayaan muqaalka, aadanaha, iyo bilicda bey'aadda. Waxa aan qiimeyn doonaa faa'idooyinka iyo saamaynta oo dhan ee ku yeelanaya muuqaalka beyadeed, bulshada, dhaqaalaha iyo nacyada gaadiidka ee qorshooyinka baddalka ah oo ay kamid yihiin mowduucyada soo socda:

- Nacyada xiriirka noolaha iyo bey'aadda iyo ilaha dabiiciga ay kamid yihiin saamaynta waxa uu dhulka ka samaysan yahay iyo dhulka, tayada hawada, ilaha biyaha ay kamid yihiin biyaxireennada korontada, shanqarta iyo ruxashada;





- Isticmaalka dhulka, qorshaynta dhulka, horumarka dhaqaalaha;
- Xaaladaha saameeya isbaddalka degitaanka iyo arrimaha bulsho-dhaqaale;
- Barakaca iyo guurista;
- Xaafadaha isla socon kara, goobaha jaaliyadda iyo adeegyada, iyo garsoorka beyadeed;
- Tayada muqaalka iyo sifooyinka quruxda;
- Nacfiyada ilaha dhaqanka iyo saamayntooda, ay kamid yihiin kuwa la xiriira ilaha taariqiga iyo qalabka qadimka, ilaha caadooyinka dhaqanka, iyo barxadaha baabuur-dhigashada/raaxada iyo Section 4 (qaybta 4aad) ilaha degaanka;
- Qalabka halista ah;


- Isticmaalka tamarta;
- saamaynta dhismooyinka; iyo
- Nacfiyada gaadiidka iyo saamayntooda (kamid yihiin gaadiidka, jidadka iyo jidadka waaweyn, jidadka tareennada, iyo dhulka ay maraan dadka lugeeya iyo kuwa bishkileetiga isticmaala).

Waxa hoos ku qoran jadwalka DEIS.

Lagu cabbiray in laga dhawro, la yareeyo, iyo laysku dheellitiro saamaynta waxyeellada la rabo in lagu aqoonsado iyo la qiimeeyo.



Dukumiintigaan waxa sii dheer nacfiyada ka imaan kara iyo saamaynta muuqaalka, aadaneed iyo bilicda beyadee, DEIS waax ka oo habeynaysaa rasmuqaalka iyo qiyaasta qarashka ku bixi doona, sadaalinta dadka raaci doona, iyo meelaha steshinada iyo xita in la aqoonsasado goobaha laga rabo in lagu farsameeyo iyo qalabka yaalla bakhaarka laga rabo tareenka LRT.



Foomka Fikradaha Qiimeynta Qorshaha

Mashruuca Southwest Transitway



Fadlan naga caawi waxa lagu qiimeynayo qiimeynta qorshaha DEIS (Warbixinta Raad ku Reebidda Beyadeed) ee qorshaha Southwest Transitway. Waxa aad fikrad ka dhibaana ka kartaa: ujeeddada iyo baahida qorshaha loo qabo; saamaynta ay ku yeelaan karto mujtamaca, dhaqaalaha, bey'aadda iyo gaadiidka. **Muddada qorshaha lagu qiimeynayo waxa uu dhammaanayaa 5:00 Galabnimo CST ee Jimcaha, Nofeembar 7, 2008, Fikradaha oo dhan waa in la helo taariiqdaasi.** Fadlan soo raaci cinwaanka warqadda dib loogu celinayo iyo fikradaha oo dhan. Warbixin kooban ee ku saabsan qiimeynta qorshaha waxa laga healya shabakadda Southwest Transitway Website: www.southwesttransitway.org

Fikradahayga waxa ay ku saabsanyihiin

- ujeedda iyo baahida loo qabo qorshaha la qiimeynayo
- faa'iidada iyo saamaynta beyadeed

- qorsheyaalka baddalka ah
- kuwo kale

Magaca

Cinwaanka

City/State/Zip (Magaalada/Gobolka/Zip)

Telefoonka

E-mail

Mahadsanid!



SOUTHWEST
transitway

inta isku laab

Tigidhka
Boostada
Halkaan ku
Dheji

Ms. Katie Walker, AICP, Transit Project Manager
Hennepin County, Housing, Community Works & Transit
417 North 5th Street, Suite 320
Minneapolis, MN 55401

inta isku laab